

Xal Ayuu Leeyahay Khilaafka Dowladda Federaalka & Dowlad-goboleedyada

Soomaaliya waxay dhexda uga jirtaa khilaaf siyaasadeed oo khatar ah, keenina kara in ay kala daataan guulihii ballaarnaa ee laga gaaray nabadaynta iyo qaran-dhisidda tan iyo sannadkii 2012-kii, markii uu dhammaaday xilligii ku-meel-gaarnimada. Baaqii 8-dii September 2018 ay madaxda shanta maamul goboleed ku sheegeen in ay hakiyeen wada-shaqeyntii dowladda federaalka, waa arrin sababo badan dartood welwel u leh, waayo, cod iyo go'aan noocan ah oo dhiillo wata, oo ay goboleedyada dalka oo idil ku midaysan yihiin, waa arrin ugub ah. Jawaab celinta dowladda (ama jawaab la'aanta dowladda) ee xiisadda sidan u baaxadda weyn, ayaa iyaduna ah arrin walaaceeda leh. Si ka badan siyaabihii hore ayay lagama maarmaan u tahay in labada dhinac ay u guda galaan wada xaajood, waayo, wadahalad ayaa ah wadiiqada ugu dhow ee heshiis looga gaari karo xasillooni darrada siyaasadeed ee hadda taagan.

Waa hubaal in xiisadda siyaasadeed ee hadda jirta aysan la curan baaqii dhawaan madaxda maamul-goboleedyadu ay kasoo saareen Kismaayo. Muddo dheer ayuu is-afgaran-waagu hoos ka hulaaqayey, sidii dhimbil dab ah oo danbas daboolay. Tan iyo intii la doortay Madaxweyne Maxamed Cabdullaahi Farmaajo, kalsooni xumada dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyadu marba marka ka danbeeya waa ay soo if-baxaysey. In kasta oo ay jiri karaan sababa kale, waxa ugu weyn oo is-afgran-waagu uu salka ku hayey waa laba faham ama fekar oo isa saamaynayey.

Tan hore, madaxda dowladda federaalku waxa ay aamineen in dowlad goboleedyadu ay fidsadeen fasirkooda awoodaha uu siinayey dastuurka ku meel gaarka ah intii ay jirtey dowladdii Madaxweyne Xasan Sheekh. Dareenkaas dowladda federaalka waxa uu oranayey, dowlad goboleedyadu, waxay noqdeen kuwo xarga goostay oo gacanta kula jira dhammaan arrimaha siyaasadda, gaar ahaan kuwa dastuurku sida gaarka ah uu ugu asteeyey dowladda federaalka. Midda labaad, goboleedyadu waxa ay ku qanceen in maamulka Madaxweyne Farmaajo ay ka go'an tahay in awoodda oo idil uu Muqdisho isugu geysto. Waxaa kale oo ay goboleedyadu aamineen in qayb ka mid aragtidaas awood aruursiga ee dowladda federaalka ay tahay in xukunka laga tuuro madaxda gobolada, laguna beddelo shakhsiyad daacad u ah Villa Soomaaliya, maadaama ay doorashooyin kusoo fool-leeyihiin dhammaan dowlad-goboleedyada.

Labada qolo midna kuma khaldana tuhunkeeda. Mid walibana dastuurka ku-meel-gaarka ah oo meeshii loo jiidaba u jiidmaya, ayay ka-qiil daydeen si ay u fidsadaan awoodahooda. Goboleedyadu waxa ay joogteysteen u fasiridda dastuurka sida ay dantoodu ku jirto, iyaga oo gaarsiistey in ay ka hawl-galaan xiriirka dibadda, gaashaandhigga iyo lacagaha, taas oo si cad uga hor-imaanaysa dastuurka ku-meel-gaarka ah. Sida ay iyaguba qirteen, waxay u safreen dalal kale iyaga oo "qaraab" raadinaya iyo taageero amni iyo mid siyaasadeed.

Machadka **Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda** waa xarun cilmi baaris oo madax bannan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon ahayn oo fadhigeedu Muqdisho yahay.

Marka laga reebo Muqdisho iyo dhulka ay Al Shabaab haystaan, xuduudaha dalka intiisa kale, goboleedyada ayaa ka taliya ama sheegta in ay ka taliyaan; waxaa kale oo ay goboleedyadu gacanta ku hayaan dekedaha iyo gegooyinka diyaaradaha oo ay ahayd in ay dowladda federaalku ka arrimiso. In kasta oo goboleedyadu ay ku doodaan in ay dowladda federaalka ka tirsan yihiin, kuna talo yihiin, haddana, marka dhinac walba laga eego, goboleedyadu waxa ay arrimahooda gooni ula yihiin ama ugu madax-banaan yihiin, sida Somaliland oo kale, taas oo gooni isku taag ay keli ku tahay ku dhawaaqday 1991. Arrimahaas marka ay dowladda federaalka eegtana, waxay dowlad-goboleedyada u aragtaa kuwo gooni socod ah. Madaxda dowladda federaalkuna maba qarsadaan tuhunkooda ah: in dowlad-goboleedyadu ay yihiin kuwo xarga-goosad ah, kuwaas oo hannaanka federaalka afka uun ka xusa, si ay ugu qiil daydaan dhaqan siyaasadeedkooda dastuurka baal-marsan.

Dhanka kale, dowladda federaalka ee Soomaaliya waxay si loo wada jeedo culayso u saartaa, una muquunisaa goboleedyada iyo madaxdooda. Siddeed iyo tobankii bilood ee lasoo dhaafay dowladda federaalka waxa ay goboleedyada tuseysey hab-dhaqan colaad iyo cadaadis wata, kuwaas oo khatar ku ahaa hannaanka federaalka ee uu asteeyey dastuurka ku-meel-gaarka ah. Goboleedyada waxaa iyagana welwel weyn ku haya in dowladda federaalka ahi ay noqoto midda kaliya ee ka amar-ku-taaglaysa siyaasadaha gudaha ee Soomaaliya iyo xiriirka caalamiga ah. Waana ay jiraan, wax badan oo muujinaya in dowladda federaalka ay doonayso inay dowlad goboleedyada ka dhigto kuwo hebed ah, una nugul hoggaaminta dowladda federaalka.

Dowlad goboleedyadu waxay darsi cad ku qaateen Hirshabeelle. Waxaa si aad ah loo aaminsanaa in dowladda federaalka ay hoos kasoo abaabushey, aakhirkiina ay ku guulaysatey xil ka qaadistii madaxweynihii hore ee Hirshabeelle, Cali Cabdullaahi Cosoble. Dowladda federaalka ayaa sidoo kale si weyn loogu eedeeyaa in ay saamayn weyn ku leedahay khilaafka sii xumaanaya ee siyaasiyiinta Galmudug. Khilaafkaas ayaa curyaamiyey isla markaana kala geeyey madaxda Galmudug ilaa 2017-kii, markii isku daygii ugu horreeyey ee lagu doonay in lagu baddelo Madaxweynaha Galmudug, Axmed Ducaalle Geelle ‘Xaaf’ uu fashilmay. Arrintaasi waxa ay keentay in dhaawac aan kasoo kabasho lahayn uu gaaro maamul goboleedka Galmudug. Jubaland-na, dowladda federaalka waxaa lagu eedeeyey inay siyaab badan cadaadis u saartay.

Waaana kamid ah inay mucaarad uga kicisay gobolka Gedo, in ay magacowday saraakiil amni, iyo madax kale iyaga oo aan kala tashan hoggaanka Jubaland, sidii uu dhigayey heshiiskii Hannaanka Aminga Qaranka ee lagu gaaray Shirkii London ee May 2017. Puntland, waxaa dowladda federaalka lagu eedeeyey in ay madaxweyne ku xigeenka xulufeysatay, si uu uga horyimaado madaxweynaha maamul goboleedka Puntland, Cabdiweli Maxamed Cali ‘Gaas’.

Tallaabooyinkaas dowladda federaalka lagu eedeeyey, waxay dhaliyeen in madaxda dowlad goboleedyadu ay falcelis mintidnimo-dirir ah la yimaadaan; waxayna is-tuseen, maaddaama ay dhammaantood doorasho galayaan sanadkaan dhammaankiisa iyo kan danbe, in dowladda federaalku ay mid mid ugu nugul yihiin. Si ay isaga caabbiyaan cadaawad ay ku qanceen in ay dowladdu u hayso, una af-beeliyaan middida siyaasadeed oo ay ku qanceen inay dowladda federaalku qoorta ka saartay, madaxda dowlad goboleedyadu waxay sameeyeen Golaha Iskaashiga Dowlad Goboleedyada (GIDG), taas oo ahayd tallaabo mug iyo macno siyaasadeed leh. Illaa intii la sameeyey golahan dabayaaqadii sanadkii tegey ee 2017-ka, goluhu ma ahayn oo kaliya gole is-dugsi iyo isku-hiillineed, balse wuxuu u xuub-siibtey madal siyaasadeed oo ay dowlad goboleedyadu muruqooda ku muujiyaan, kulana faltamaan dowladda federaalka. Baaqyadooduna waxay noqdeen kuwo midba midka ka sii danbeeya uu dowladda federaalka uga dhalleecayn kululaa, taas oo muujinaysey sida ay u qodan tahay cuqdadda ay u qabaan dowladda federaalka oo ay ku sunteen mid federaal diid ah.

Kala irdhowga dowlad goboleedyada iyo dowladda federaalka, waxay dalka iyo dadka Soomaaliyeed dhaxal-siisay inay xal iyo hoggaamin ka sugaan, laba quwadood oo kala aamin baxay, una tafa-xaytey xarig-jiid siyaasadeed oo aan waxba la xeerinayn. Waana xaqiiq in dalka iyo dadka Soomaaliyeed ay iyagu noqonayaan kuwa dhabarka u ridanaya khasaaraha ka dhasha is-mariwaagaas siyaasadeed.

Cawaaqib Xumada Xasillooni Darrada Siyaasadeed

Taariikhda dhow ayaa dhigaysa in aan cidna ka faa’iidin is-qabqabsiga iyo xasillooni darrada siyaasadeed. 2013 kii, madaxweynihii markaas la doortay ee Xasan Sheekh Maxamuud waxa uu geliyey awood siyaasadeed oo ballaaran sidii uu u joojin lahaa dhisiddii Jubaland oo markaas curdan ahaa,

isaga oo ku doodayey in si aan xalaal ahayn loo hirgeliyey gobolkaas, dal ajnabi ahna uu ku daabnaa. In kasta oo dowladdii federaalka ee xilligaas ay haysatey qiilal qaarkood loo qaateen ahaa oo la xiriiray hannaanka iyo loo-dhammaan la'aantii samaynta Jubaland, haddana, sida ay dowladdu u isticmaashay awooddeedii waxa ay noqotay mid aysan mahdin, una xaqiijin rabitaankeedii. Dhammaadkii 2013-kii, dowladdii Madaxweyne Xasan Sheekh, waxay ku khasbanaatay inay Jubaland wadahadal nabadeed oo ay Itoobiya garwadeen ka tahay kula gasho Addis Ababa. Xasan Sheekh-na kuma uu guul-darraysan oo kaliya dagaalkii uu uga horyimid dhisidda Jubaland, balse waxaa kale oo uu ku guul-darraystay iska caabbinta faragelinta dibadda, kuwaas oo mar walba isha ku haya, gol-daloollo ay gacma-gacmaynta arrimaha gudaha ee Soomaalida uga soo dusaan. Heshiiskaas Jubaland ayaa ku guulaysatey oo heshay intii badnayd wixii ay dalbanaysey, dowladdii federaalkuna waxa ay ku khasbanaatay in ay wax badan u deyso Jubaland, wadahalkaasna waxa kale oo ay dowladda federaalku kala soo rogmatey nugeyl iyo in laga gacan sarreeyey.

Si kastaba ha ahaatee, Xasan Sheekh cashar weyn ayuu ku qaatay loollankii lagu legdey ee uu la galay Jubaland. Casharkaasi waxa uu ahaa: in waddada kaliya ee u furan waddan colaad kasoo kabanaya –awoodda iyo khayraadkana lagu muransan yahay – in ay tahay in talada la wadaago, taas oo weliba ah arrin ku qeexan dastuurka. Weliba, Madaxweyne Xasan Sheekh, waxa uu si faro-ka-gubasho ah u fahmey in aalaaba goboleedyadu, marka siyaasad ahaan loo eego, ay yihiin bumbo qarxaysa oo kale, una baahan in si taxaddar leh loo maareeyo. Sanadihii danbe, Madaxweyne Xasan Sheekh waxaa lagu ammaanaa inuu hormuud ka ahaa dhismaha dowlad goboleedyada Koonfur Galbeed, Galmudug iyo Hirshabeelle, in kasta oo marar badan hirgelinta goboleedyadaas ay u ekaayeen hawlo aanba suurtagal noqon karin.

Sidoo kale, Xasan Sheekh waxaa lagu ammaanaa hirgelintii Madasha Hoggaanka Qaran oo markii dib loo milicsado ahayd gole tala-wadaag, oo ay ka dhexeysay dowladda federaalka ah iyo dowlad goboleedyada. Inta badanna, inkasta oo madashaas aanay ahayn mid ceeb-ka saliin ah, haddana, madashu waxay ahayd gole talo midaysan oo wadar-oggal ahaan go'aamada waaweyn ee dalka oo idil lagu gaarayey. Dowlad goboleedyaduna talada guud ee dalka wixii ay ra'yi ka qabaan madashaan ayay si xanaf la'aan ah oo ama toos ah ama dadban usoo

dhex marsan jireen, waxayna kaloo ahayd gole tala-wadaagga iyo kalsooni dhisidda qayb ka qaadatay.

Maanta, waxaa la la'yahay dareen iyo aragti garowsan inaan la is huri doonin. Dowladda federaalka ah waxa ay u eg tahay mid ay ka go'an tahay inay muquuniso dowlad goboleedyada iyo mucaaradkeeda kale ee Muqdisho ku sugan. Mana ahan taasi mid ay tabarteeda leedahay. Dhanka kale, dowlad goboleedyada waxaa iyana ka go'an inay iska caabbiyaan dowladda dhexe, jidkay doonaan ha u maraane, xitaa haddii ay noqoto inay faraqa ku xirtaan quwado shisheeye. Sii socoshada is-qabqabsiga iyo ficiltanka dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada, waxay wax yeelaynayaan danaha labadaba iyo midda dalka, ha noqoto dan siyaasadeed, mid dhaqaale ama kuwo amni. Bilihii lasoo dhaafay, illaa intii iyagu ay isku jeesteen, is-qab-qabsiguna uu cirka isku shareeray, hawl-galladii Al Shabaabka lagu wajahayey waxaa galay hakad. Madaxda maamul goboleedyadu waxay ku mashquulsanaayeen is difaacid, si aan loo marsiin jidkii madaxweynihii hore ee Hirshabeelle, Cali Cabdullaahi Cosoble. Iska daa inay ka mashquuleen dagaalka cadowgooda Al shabaab iyo Daacish, waxay kaloo dayaceen labada heer dowladeed inay dadka ay xukumaan gaarsiiyaan adeegga ay mudan yihiin iyo inay u banbaxaan hawlaha kale ee kala-guurka ee dhammaystirka dastuurka, sugidda aminga iyo hirgelinta doorasho qof iyo cod ah. Dhanka kalana, madaxda dowlad goboleedyada, gaar ahaan Galmudug, Hirshabeelle iyo weliba Puntland waxay la gebi-dhac-laynayaan xal u helidda khilaafyo gudaha uga furmay. Gaar ahaan Galmudug, oo aadba mooddo in ayba burbur qarka u saaran tahay, wuxuuna maamul goboleedkaan nugul si degdeg ah ugu baahan yahay gurmada iyo badbaadin intii aysan xaaladdiisu gelin meel aan wax ka qabasho lahayn.

Hirshabeelle-na waa gobol kale oo weli aan si dhamaystiran u dhismin, lana daalaa-dhacaya faragelin dowladda federaalka lagu eedaynayo. Inkasta oo Madaxweyne Waare uu dhawaan shaaciyey in xiisaddii dowladda federaalka kala dhaxaysay la qaboojiyey, haddana, waxa uu carrabka ku adkeeyey in dowladda Madaxweyne Farmaajo ay si niyad ah ula xaajooto goboleedyada. Mana aha markii koobaad oo Waare uu dowladda federaalka ah la heshiiyey, oo waxaa jira is-afgaradyo hore oo miro dhal noqon waayey, wakhtiga ayaana sheegi doono inta ay is-afgarashadan sii jiri doonto.

Puntland, xaaladdu sida Galmudug uma calawsana,

inkastoo ay welwelkeeda leedahay. Waa arrin ugub ah in madaxwyne-ku-xigeen - dastuur ahaan iyo xaqiiqo ahaanba awooddiisu xaddidan tahay - in uu bannaanka ula soo baxo mucaaradnimada madaxweynihiisa. Taariikh ahaan, madaxweyne ku-xigeennada Puntland, waxa ay ahaayeen kuwo madaxweynayaashooda la shaqeyya. Madaxweyne ku xigeenka Puntland, Cabdixakiim Camey, waxa uu si joogta ah uga biyo diidsanaa go'aammada Golaha Iskhaashiga Dowlad Goboleedyada, oo ay ku jirto go'aammadii kasoo baxay kulankii ugu danbeeyey ee ay ku hakiyeen xiriirka dowladda dhexe.

Diidmadiisu ma saamayn jirin Puntland, laakiin, maaddaama doorashadii madaxweynaha Puntland ee Janaayo 2019 ay soo dhawaatay, madaxweyne Gaasna uu Golaha Iskaashiga Dowlad Goboleedyada uu guddoon u yahay, gadoodka madaxweyne-ku-xigeenkiisa waa mid, haddii uu Gaas tartamayo, dib-u-doorashadiisa dhantaali karta.

Madaxda Kuufur Galbeed iyo Jubbaland qudhoo waxaa kusoo fool leh doorasho madaxweyne, bilaha soo socda. Waxayna ku doodayaan in dowladda federaalku ay caawinayso mucaaradkooda ayna ka go'an tahay in aysan madax sii ahaan. Ama dareenkaas run ha noqdo ama yaanu noqonine, labada dhanacba waa isku tafo-xayteen. Jubbaland xaaladdeeda ayaana sii wel-wel badan, siyaasad iyo amni ahaanba. Madaxweyne Axmed Madoobe waxa uu ka cabanayey in dowladda federaalka in ay xasillooni darro ka waddo gobolkiisa iyada oo ku kicinaysa siyaasiyiin gobolka Gedo kasoo jeeda, kuwaas oo la hayb ah Madaxweyne Faramaajo. Weligeed, Soomaaliya loollanka qabaa'ilka wuxuu ka ahaa arrin khatarteeda leh, isku dhacna si fudud u keenta, magaalada Kismaayana kuma sii jirto, oo magaaladaas dekedda ah, waxa ay ahayd meel ay ku loollamaan beelaha ay kasoo jeedaan Madaxweyne Farmaajo iyo Axmed Madoobe.

Somaliland xitaa kama aysan fakan haraatida dowladda federaalka ah. Bilo kahor, dowladda federaalka waxa ay deeq bixiyayaalka amartay inaysan si toos ah Somaliland caawimo iyo deeqo horumarineed u siin karin, iyadoo aan dowladda dhexe oggolaansho laga qaadan. Tallaabadaasna dowladdu waxay ku baddeshey siyaasad illaa sannadkii 2000 lagu shaqaynayey oo ahayd inaan la siyaasadayn, laysna hortaagin wixii deeq iyo horumarin ah oo ku socda deegaannada Somaliland. Dowladdihii isaga dambeeyay dalka waxay kala duween hadafkoodii ahaa dibu mideynta dalka iyo arrimaha bini'aadamnimada iyo kuwa horumarinta.

Siyaasaddaas ayaa ahayd mid Somaliland iyo Soomaalida kalaba u shaqaysay, ayna isla oggolaayeen. Siyaasadda cusub ee dowladda federaalku waa hubaal inay sii murjinayso wadhadalladii Somaliland ee awalba hakadku galay.

Jahawareerka Siyaasadeed ee Aloosan

Illaa intii qaab xoog-sheegasho ah xilka looga xayuubiyey afhayeenkii hore ee Baarlamaanka Maxamed Cismaan 'Jawaari' horraantii April 2018 iyo ka horba, dowladda federaalku waxaa ka dhex socdey jahawareer, taas oo aalaaba keenaysey bedelaadda madax sare iyo wasiirka aanay caddayn faa'iidada ku jirta bixintooda. In ka yar kala bar wasiiradii March 2017 helay kalsoonida baarlamaanka ayaa hadda golaha wasiirrada ku jira. Sanad iyo barkii lasoo dhaafay, taliyayaasha hay'adaha amniga sida booliiska, nabadsugidda iyo militeriga ayaa midkiiba saddex goor la badeley. Tiro badan oo safaaradaha Soomaaliya ah ayaa iyaguna safir la'aan ah intii Madaxweyne Farmaajo iyo Ra'iisul Wasaare Khayre ay talada qabteen. Baaqii Ra'iisul Wasaaraha ee ahaa in loo tartami doono xilalka sare ee wasaaradaha ayaan dhaqan gelin. Hawlwadeennadii sare ee wasaaradihii muhiimka ahaana si habqan ah ayaa wali loo magacaabaa.

In Aqalkii Sare uu diido ka qayb-galka furitaankii kalfadhiga baarlamaanka ee Madaxweynuhu furay bishii September, iyana waxay ahayd calaamad tilmaanaysa kacsanaanta heer-kulka siyaasadeed. Waxaan qarsoodi ahayn in xildhibaanoo aan yarayn iyo shacab badan ay dowladda col la yihiin, taas oo ay sabab uga dhigeen siday ay ugu hungoobeen dowladda iyo waxay ku sheegeen siyaasado kali-talisnimo iyo cabburin ah oo ay ku shaqaynayaan madaxda dowladda federaalka. Saxaafadda caadiga iyo baraha bulshada ayaa noqday meel lagu hardamo. Dacaayadda siyaasadeed iyo colaadaha afka ah ayaa gaarey meel aan horay loo arag, iyada oo laga tagey sarrigtii iyo wax-is-kula-harkii. Iyadoo aan dowladda Farmaajo labo sano jirsan, ayaa khilaafka iyo xafiiltanka kala dhexeeyey siyaasiyiinta dalka, waxay gaareen meel aan horay loo arag oo uba eg, midda ka dhex aloosan madaxweynaha Maraykanka iyo mucaaradkiisa. Is qabqabsiga iyo xasillooni darrada siyaasadeedna waxay dowladda dhexe ka jeedisey shaqooyinkeedii aasaasiga ahaa. Muqdisho iyo meelo kalaba ammaan-darradii jirtey sanadkii la soo dhaafay waa kasii dartay. Jidad badan oo caasimadda ahna waxa ay noqdeen kuwa laga go'ay maridooda, jid-xiriddii oo badatay awgeed,

taas oo misana wiiqday dhaqaalihii. Sida Bangiga Adduunku uu ku sheegay qoraalkiisii ugu danbeeyey ee uu uga faalloonayey xaaladda dhaqaale ee dalka, wuxuu sheegay in kobaca dhaqaale ee 2016-kii uu ahaa 4.4 boqolkiiba, halka 2017-kiina uu noqday 2.3, taas oo gaabiska ama dib u dhaca dhaqaale ka dhigaysa mid 50% u dhow.

Xaaladda siyaasadeed ee dalka ee qasan waxa ay fursad siisay Al Shabaab. Sida ay sheegeen xildhibaano badan oo arrimaha amniga ka hadlay, kulankii ugu danbeeyey ee baarlamaanka ee amniga diiradda lagu saaray, kooxda Al Shabaab waxay ka mintidsan yihiin sidii ay ahaayeen 2011-kii markii Muqdisho laga saaray. Qaybaha bulshada oo dhan ayay lacag baad ah ka aruursanayaan, oo ay ka mid yihiin dadka Muqdisho ku nool. Jidadkii Muqdisho uga baxayey ama ka soo galayey koofur iyo woqooyiba, waxay noqdeen kuwa aan la mari karin, waayo Al Shabaab ayaa qabsaday ama kulaalaya. Waxaa ayaan darro u ah Soomaaliya inay xildhibaannada qaar sheegeen in dadka ay matalaan qaarkood ay caddaalad ka doonteen maxkamadaha aanay oollin wax turid ah ee Al Shabaab, maaddaama maxkamadaha dowladda federaalka uu diloozey musuqmaasuq iyo dareen ah in nidaamkii garsoorka la siyaasadeeyay.

Markii ugu horreysey ilaa intii Madaxwyne Farmaajo la doortay, xildhibaano aan yarayn oo qaarkood ilaa dhawaan dowladda u dhawaa ayaa billaabay inay si qarsasho la'aan ah dowladda ugu dhaliilaan amni darrada baahday iyo xasilloonni la'aanta siyaasadeed. Xildhibaano badan ayaa walaac ka muujiyey waxay ku tilmaameen isku day iyo faragelin toos ah oo dowladda dhexe ku doonayso in ay baddesho madaxda goboladooda. Xildhibaannadaas ma doonayaan inay dowladdaan gacanta ku dhigto gobollada, maxaa yeelay taasi waxay mugdi galineysaa in dib loo soo doorto sanadkan 2020.

Dowladda federaalku waxaa kale oo ay lasoo baxday dulqaad darro mucaaradkeeda ah. Bishii December 2017, ciidan nabadsugid ah ayay dowladdu ku weeraray hoyga wasiir hore, C/raxmaan C/shakuur, haddana hoggaamiye u ah Xisbiga Wadajir. Weerarkaas guuraha ahina waxa uu sababay in la dilo shan ka tirsan ciidankii ilaalinayay siyaasigaas. Hab-dhaqankaasina waxaa uu ahaa arrin ugub ah, marka laga eego dhiirranaanta iyo jixin-jix la'aanta falkaas. Waxaa taa la socdey in xildhibaannada qaar la isku dayey, looguna gooddiyey in xasaanadda laga qaado si loo maxkamadeeyo, iyada oo dhanka kalana la tusayo saxaafadda xorta

ah iyo bulshada rayadka ah baqdin gelin, ujeedkiisu yahay in la aamusiyo oo ay afkooda xirtaan. Iyada oo istiraatiijiyadda dowladdu u ekayd mid abuuraysa jawi cabsi-gelin ah, haddana wax-ka-sheeggidda dowladda waa qayb kamid ah dhaqanka Soomaalida.

Soomaaliya waxaa maanta yaalla: siyaasad aan turid lahayn, ah qof-kastow naftaa, aan wax la isku hanbaynayn, xuduudna aysan xirin loollanka oo wax kasta la xalaalaystay, taas oo hor-is-taagtey in wax laga qabto shaqooyinka yaalla. Hor-u-socodsiintii hawlihii qabyada ahaa ee siyaasad lahaa, amni lahaa, dhaqaale lahaa iyo dastuur iyo doorasho dhammaantood waxa ay noqdeen kuwo xanniban. Tusaale waxaa ah Hannaanka Amaanka Qaran oo London 2017 kii looga soo heshiiyey, fulintiisuna ay ku xiran tahay wadashaqaynta dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada. Sidoo kale, dib-u-eegista dastuurka iyo in laga heshiiyo in hannaanka doorasho ee dalka, waxa ay u xanniban yihiin is-afgran-waaga dowladda federaalka iyo dowlad goboleeyada.

Xitaa dhaqaaluhu waxa uu eersaday xasillooni darrada siyaasadeed. Bangiga adduunku waxa uu warbixintiisa Qiimaynta Xaaladda Dhaqaale ee Soomaaliya ku tilmaamay, “Caqabadaha Soomaaliya ka haysta kordhinta dakhliga, waxa ay xiriiir toos ah la leyihiin hannaanka dekhli wadaagga ee federaalka. [Dowlad Goboleeyada] waxay aruursadaan, haystaanna wixii canshuur ah oo deeganooda ah; dowladda federaalka Muqdisho oo kaliya ayay dhekhli ka heshaa. Qaab siyaasadeed noocan ahina waxa uu adkaynayaa in barnaamij dhammeystiran oo canshuur-qaad dalka oo idil laga hirgaliyo. Haddii aan la dhisin hannaan lagu maareeyo farqiga wax-soosaar iyo dekhli aruurinta oo u dhexeeya goboleedyada, madax-bannaani-daas dhaqaale aruursi, waxa ay uga sii daraysaa sinnaan la'aanta dhaqaale ee dalka. Is-afgarashada helidda dhekhli iyo cidda aruurinaysa ayaa fure u ah dhekhli aruurin baahsan iyo hirgelinta adeegyada bulshada.”

Wadiiqooyinka Loo Xallin Karo Is-maandhaafka

Inkastoo kala taagnaan ay jirto, lana kala aamin baxay, haddana, qaabab badan oo labada dhinac ay meel dhexe isugu imaan karaan ayaa jira. Sidaas oo ay tahayna, hal-tallaabo oo keliya oo mushkiladda taagan xal u noqon karta ma jirto, oo waa in tallaabooyin kala duwan oo xiriirsan la qaado. Taariikh-duna waxay tilmaameysaa, xasillooni darro siyaasadeed iyo is-qabqabsigu in ay dhalaan cuqdad, taasoo iyana disha kalsoonida dhinacyada.

Asalka khilaafku waa is-qab-qabsi jiidamey oo u dhexeeya dowladda federaalka iyo goboleedyada, taas oo ku qotonta dastuur ku meel gaar ah oo sida margi qof kastaa meeshuu doono u jiidanayo. Waddamada federaalka ah, in awoodda ay isku qabsadaan unugyada midowgu waa mid badanaa dhacda. Waxaase culayska is-qab-qabsigaasi aad uga muuqdaa dalalka federaalku ku cusub yahay iyo kuwa colaadda ka soo kabanaya sida Soomaaliya oo kale. Hannaanka Machadka Heritage uu u arko in is-mariwaaga lagu soo afjari karo, waxa uu salka ku hayaa, shan arrimood oo aannu ku qanacsannahay:

Kow, dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada waxaa haysta xannibaadyo waaweyn kuwaas oo labadaba ka dhigaya kuwa tabar daran. Midkoodna midka kale kama takhalusi karo. Sidoo kale, midkoodna kan kale ma sumcad dhaamo. Labaduba waa daciif siyaasad ahaan iyo awood ahaanba. Nasiib wanaag cudud military oo la isku muquuniyo meeshaba ma taal. Kulligoodna waxay kursiga ku heleen doorasho dadban oo ay hareeyeen musuqmaasuq sida hirka u baahsan. Xitaa in la hadal hayo waxay ku mutaysteen ciidanka AMISOM oo ku waar-diyeeya halka magaalo oo uu mid walba ka taliyo, dowladda federaalkuna waa la mid. Puntland uun ayaa dhul ballaaran xukunta, iyada qudheedana Al Shabaab iyo Daacish ayaa si isa soo taraysa ugu maqan.

Labo, is-mari-waaga hadda taagan inta uu dastuurka salka ku hayo in le'eg ayuu yahay khilaaf siyaasadeed. Inkastoo margi-nimada dastuurka uu qofba meeshuu doono u jiidanayo ay tahay caqabad qodax ku noqotay qaran-dhisidda Soomaaliya, haddana fashilka ay madaxdu si wadajir ah ugu fashilmeen inay gaaraan is-afgarad isku-tanasul ku salaysan, waxa ay calaamad u tahay sida madaxdaasi ay ugu fashilmeen inay hoggaamiyayaal noqdaan. Haddii laga soo tago dastuurka, waxaa jira habab kale oo oo sahli kara in meel dhexe la isugu yimaado. Tusaale ahaan, Madasha Hoggaanka Qaran, ayay dib u soo noolayn karaan. Iyadoo madashaasi lahayd gol-doloolooyinkeeda (sida in ay baarlamaankii iyo golihii wasiirada badiil u noqotay mararka qaarkood), haddana waxay muujisay in xilligii Madaxweyne Xasan Sheekh ahayd gole ay madaxda dowladda federaalka iyo kuwa goboladu ku doodaan, kuna xalliyaan khilaafkooda talo midaysanna ku gaaraan, iyaga oo aan ku dhex caraatamin shacabka dhexdiisa, saxaaafadda aan warar isku marin, ajaanibta faragelinta farabaxsiga u ah ee loo yaqaan bulshada caalamkana, aan fursad siin.

Fikrad saxa uma eka doodda dowladda federaalka ee oranaysa Guddiga Amniga Qaranka ayaa badiil u ah Madasha Hoggaanka Qaran. Guddiga Amniga Qaranku waa guddi farsamo oo shaqooyin cayiman leh, meesha Madashu ahayd gole arrimaha siyaasadda iyo wixii ay wada danaynayaan dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyadu looga xaajoodo. Labaduse waa is buuxin karaan, lana wada samayn karaa.

Saddex, dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyadu waxa ay degsan karaan faham-guud oo la isla oggol yahay oo lagu wada shaqeeyo, iyada oo haykal kasta oo dowli ah (dowladda dhexe ama kuwa gobollada) lagu ixtiraamayo masuuliyadihiisa. Weliba, inkastoo dastuurka ku meel gaarka ahi uu si weyn ah u mugdiyeysan yahay, awoodahana isku dhex-gelinayo, haddana, sida dhabta ah, meelo uu aad u cad yahay ayaa jira oo uu si waadax ah u kala saarayo awoodaha dowladda federaalka ah iyo kuwa goboleedyada. La iskuma haysto in difaaca, arrimaha dibadda, lacagaha, xuduudaha iyo socdaalka ay tahay hawl gooni u ah masuulna ay ka tahay dowladda federaalka ah, (inkasta oo haddii wadatashi iyo wadashaqeyn lagala yeesho gobolada lagu fa'iidayo). Sidoo kale, goboleedyadu waxa ay ka hawl geli karaan: booliiska deegaanadooda, adeegyada aasaasiga ah sida waxbarashada, caafimaadka iyo fulinta garsoorka deegaanadooda. Waxaana daruuri ah in dowladda dhexe ay faraha ka qaaddo siyaasadda hoose ee gobolada. Madaxweyne ay dowladda dhexe Muqdisho kasoo maqaar-saartay, waa hubaal in aanu deegaanada gobollada kalsooni ku heli doonin. Waana la og yahay in siyaasadda dhabta ah ay ciyaaraan dadka u fara dhuudhubaan ama deegaanka ah. Sidoo kale labada dhinac – dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyadu - waxa ay ka wada shaqeyn karaan, ayna tahay in ay ka wada shaqeeyaan, arrimaha qabyada ah, ayna tahay in lagu dhaqaaqo, sida dhammaystirka dastuurka qabyada, wadaagga khayraadka, ku heshiinta hannaan doorasho oo lagu wada qanacsan yahay, sharciga jinsiyadda, iwm, kuwaas oo lala daahay.

Afar, labada dhinac waa in ay kalsoonida dhexdooda ah soo celiyaan, dhisaanna, waana awoodaan. Hadda, cabsi weyn ayaa la kala qabaa, sida ku caddayd war-murtiyeedkii ugu danbeeyey ee Golaha Iskaashiga Dowlad-goboleedyadu uu soo saaray, kaas oo ay ku codsadeen in gacan saddexaad ay dhex gasho. Xitaa marka loo eego siyaasadda Soomaaliya oo muddo dheer calawsanayd, u gacan haatinta shisheeye inuu soo dhex galo madaxda Soomaalida waa arrin aad u hooseysa.

In ajaanib ay dhex gasho madaxda Soomaalida, ma aha arrin u cuntanta hoggaamiye isku kalsoon. Waxa ayna taasi sii qasi kartaa xiisaddii siyaasadeed ee kacsanayd, iyada oo taasi fursad siin karta, danley shisheeye oo mushkiladda daraf ka noqota. Wadahadallada dowladda federaalka iyo Hirshabeella ayaaba ah talaabo yididiilo leh, mudanna in aysan noqon mid kaligeed ah, waana in aan dowlad goboleedyada kale lagu soo daraa heshiiska.

Shan, Aqalka Sare masuuliyad dastuuri ah iyo mid siyaasadeed ayaa ka saaran inuu ku baxo xal u helidda khilaafka jira, waana in lagu caawiyaa si ay waajibkooda u gutaan. Markii horaba Aqalka Sare, waxaa loo asteeyey in uu noqdo Golaha Federaalka, xubnaha Aqalka Sarena waxaa ku badan ruug-caddaa siyaasadeed, oo xiriirro dhow la leh gobollada ay kasoo jeedaan iyo madaxdoodaba. Tallaabada ay u qaadeen inay xiisadda xal u raadiyaan, waa mid hoggaamineed, dhegahana uga roon is-dhalleeayntii dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada baryahan idaacadaha ay isku marinayeen. Xubnaha Aqalka Sare waa kuwa fahamsan dowladda federaalka maaddaama ay Muqdisho kula nool yihiin, ayna dhici karto in ay si buuxda u arkaan waxa la isku hayo, ugana fara dhuudhuub-naan karaan madaxda dowlad goboleedyada.

Talooyin tixgelin mudan

Madaxda dowladda federaalka iyo kuwa dowlad goboleedyadu, talaabooyinkan ayay qaadi karaan, si ay xal uga gaaraan xiisadda ka dhex aloosan:

- Si uu kalsooni u dhiso, derbiga kala-shakiga iyo colaadana u jabiyo, Madaxweyne Farmaajo sida ugu deg-degsan wadahadal toos ah ha ugu baaqo madaxda dowlad goboleedyada, hana u caddeeyo in uu diyaar u yahay in uu magaalo madaxyada gobolada ugu tagayo, sida Garoowe.
- Madaxda goboleedyadu kalsooni dhisidda madaxweynaha, jawaab ha uga dhigaan in ay aqabalaan baaqiisa, meeshana ha ka saareen in shisheeye uu dhex-galo.

- Ahmiyadda koobaad ee kulankaasi ha noqoto: b) shaaca ka qaadid iyo ballan-qaad dhab ah oo dowladda federaalku ku bixinayso inay ka waantoobayso, joojinaysana faragelinta iyo gacma-gacmaynta siyaasadaha hoose ee -goboleedyada. Dowladda federaalku waa inay sidoo kale ballan-qaaddo inay oggoshahay in doorasho xor ah oo xalaal ah, oo aanay cidna u hiillinayn, cidna ka hiillinayn ay ka dhacdo gobollada. t) dowlad goboleedyadu waa inay si caddaan ah u ballan-qaadaan in ay ka hirgelineyaan gobolladooda doorasho xor ah oo xalaal ah, ayna u oggolaadaan korjoogto rasmi ah oo bulshada rayidka ah. j) dowlad goboleedyadu waa inay ballan-qaadaan inay dowladda federaalka uga danbaynayaan siyaasadda arrimaha dibadda, difaaca, lacagaha, socdaalka iyo kuwa kale oo si cad dastuurku dowladda federaalka ugu asteeyey. x) waa in laga tashado dib u yagleelidda Madasha Hoggaanka Qaran oo noqon karta gole madaxda heer qaran iyo heer gobol ay ku midaysan yihiin, taas oo lagu gorfaynayo loogana heshiinayo arrimaha masiiriga ah. kh) Dib u aasaasidda Madasha Hoggaanka Qaran waa inaysan keenin wiiqidda awooddii baarlamaanka ee sharci-dejin iyo inaysan la wareegin awoodihii golaha wasiirada.

- Labada dhinac – dowladda federaalka Soomaaliya iyo dowlad goboleedyadu – waa inay ku heshiiyaan qorshe-hawleed ku aaddan sidii loo dhamaystiri lahaa arrimaha masiiriga ee laga daahay hirgelintooda, si aysan u soo noqon xasillooni darrada siyaasadeed ee taagan. Arrimaha in la iska afgarto u baahan waxaa ka mid ah, qabyo tirka dastuurka, dimuqraadiyeynta dalka sida in lagu heshiiyo hannaan doorasho oo xalaal ah, wadaagga khayraadka, haykalka amniga qaranka, hannanka garsoorka federaaliga ah iyo maxkamadda dastuuriga ah. Baarlamaanku waa in uu derso, kaddibna ansixiyo ama diido wixii madaxda siyaasaddu ku heshiiyaan.
- Haddii la iimaansado, mudanyaasha Aqalka Sare waa ay awoodaan inay xalliyaan khilaafka dhex yaalla dowladda federaalka ah iyo dowlad goboleedyada, maaddaama ay labadaba ku daaban yihiin. Sidaas darteed, dadaalladda Aqalka Sare waa in lasoo dhaweeyo, lana taageero. Ilaa hadda safarradii xaqiiqo raadinta ahaa ee ay ugu bexeen xakamaynta khilaafku tillaabo ammaan mudan ayay ahayd.

- Iyaga oo ku kulmaya Madasha Hoggaanka Qaran, dowladda federaalka ah iyo dowlad goboleedyadu waa inay isku bahaystaan badbaadinta Galmudug. Goboleedkaan oo in badan oo siyaasiiinta Soomaalidu ka soo jeedaan (sida Madaxweynaha iyo Ra’iisul Wasaaraha), wuxuu si weyn ugu baahan yahay xasillooni, dib-u-heshiisiin iyo doorasho dimuqraadi ah. Sida ay hadda Galmudug u taal, oo ah inay madaxweyne, kuxigeen, ra’iisul wasaare, iyo baarlamaan kala fadhiya magaalooyiin kala duwan tahay, ma aha mid sii socon karta.
- Dowladda federaalku dib ha uga noqoto siyaasaddeeda cusub ee xaddidaysa hannaanka Somaliland ay ku hesho deeqaha bini’aadamnimo iyo taageerada horumarineed, taas ayaana keeni karta in ay dib u hirgalaan wadhadalladii Soomaaliya iyo Somaliland ee hakadku galay.
- Dowladda federaalka ahi waa in ay si buuxda u dhowrto xuquuqaha, mabaadii’da iyo dhaqanka dimuqraadiyadda ee dastuurka ku cad, gaar ahaan xuquuqda xor u ahaanshaha in dadku ay dareenkooda cabbiri karaan, xuquuqda dadku in ay kulamo qabsan karaan iyo xuquuqda in dowladda laga caban karo, lalana xisaabtami karo. Duudsiiga xuquuqaha aasaasiga ah iyada oo baahi amni lagu marmarsiyoonayo xasilloonina uma keenin dowladda federaalka, kamana dhigin mid horumarsan. Waxaaba la oran karaa, waxa ay ka dhigtay, mid taag daran, oo nugul, ka mashquulsan hawlihii aasaasiga ahaa ee u yaalay, kuna jirta jaah-wareer joogto ah.



Akhristayaasha waxaa la ogeysiinayaa inay daabici karaan qoraalkan, haddii aaney ka ganacsaneyn. Maadaama uu Machadka Heritage leeyahay xuquuqda qoraalka, waxaa laga codsanayaa ciddii dibu u daabacda inay xusto Heritage, isla markaana Machadka lasoo socodsiiiso.

© Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda. Qoraalkan waxaa lagu daabacay hannaanka Creative Commons Attribution, qaybtiisa aan macaash-doonka aheyn (CC BY-NC 3.0)